



Xidhiidhada Haboon Xaashida Macluumaadka

Xidhiidhada haboon waa saldhigga bulshooyinka badbaadsan isna daryeela. Caruurta ku kurta guri uu ka jiro xidhiidh haboon waxa ay badanaa noqdaan kuwo si fiican u barbaaray. Dadka leh xidhiidho haboon cimri dheer iyo nolol macaan ayey ku sugnaadaan.

Toban sifo ee xidhiidhada haboon:

1. Weheladu xidhiidhku way is qadariyaan, keli ahaan iyo wadajirba. Waxay ogyahiin sida ay u kala duwan yihiin, waxa ayna isu qadariyaan si xishood iyo maamus leh.
2. Weheladu way siman yihiin. Go'aanada way wada gaadhaan, haddi ubad ay leeyihiina way wada koriyaan.
3. Marka weheladu arrin isku qabtaan, waxa ay aqoonsanyihiin in ay ka wada hadli karaan wax yaalaha u dhaxeeya. Wada jir ayey khilaafkooda jid ugu sameeyaan si ay u wada helaan waxa ay rabaan.
4. Weheladu way is maqlaan waxa ayna qadariyaan arigtida wehel kasta leeyahay. Wehel kastaba waxa uu soo bandhigaa aragtidiisa iyo dareenkiisa. Weheladu faallo xun iskama sheegaan.
5. Wehel kastaaba xilkiisa wuu kasoo baxaa. Wehelna ma qabo in wehelka kale uu dhibtiisa oo dhan maareyn karo ama uu ka dhigi karo qof marwalba farxaan ah.
6. Wehel kastaa wax uu ku kalsoon yahay in uu keligii waqti qaadan karo haddii uu u baahanyahay. Waxa wehelada la fiican in wehel kastaa si gaar ah waxyaalo u sameysan karo.
7. Cabsi kuma jirto xidhiidhkooda. Xidhiidhada haboon waxa ay ku dhisanyihiin jaceyl, tixgelin, daryeel iyo farxad.
8. Weheladu iskuma dayaan in ay is xukumaan ama is xakameeyaan. Mid waliba wax uu taageeraa ama dhiiri geliyaa horemarka wehelka kale.
9. Marka wehel mashquul yahay wax uu isku dayaa in uu waqti u helo wehelkiisa iyo xidhiidhkooda.
10. Weheladu waxa ay ku xidhan yihiin dad iyaga yaqaan kuna taageersan wada noolaashahooda wehelnimo. Waqti ayey la qaataan dadka si haboon u wada nool.

Xidhiidhkaaga ka dhig mid adag oo haboon

Daryeelka xidhiidhka haboon waxay u baahantahay waqti, awood iyo daryeel – wayna u qalmaan. Xidhiidhka haboon waxay xubnaha qoyska ku abuuraa dareen tixgelis ah, farax iyo nabadgelyo. Is ka horimaadku waa ka mid xidhiidh kasta, dadkuna mar mar bay u baahanyihiin gargaar kale. Adeegyada Caruurta iyo Dhalinyarada ee Alberta waxa uu leeyahay gargaar telefoon oo ku siin kara macluumaad ku saabsan xidhiidho kala duwan oo ay ka midyihiin arrimo ku lug leh sida aad u abuuri lahayd xidhiidh haboon oo adag, iyo sida aad wax uga qaban karto darxumada ku saabsan dagaalka qoyska. Si aad u heshid telefoonkan 24-saac wac **310-1818** (oo bilaash ah,) una sheeg qof ka aad la hadlayso gargaarka ama macluumaadka aad u baahantahay.

Raadi Macluumaad

Si aad u heshid gargaarka bulshadaada ama macluumaad dheeraad ah, fadlan wac telefoonka 24-saac ee Khadka Macluumaadka Dagaalka Qoyska (ee bilaashka ah) ee **310-1818** ama booqo **www.familyviolence.alberta.ca**.

Adeegyada Caruurta iyo Dhalinyarada ee Alberta wax uu ku kalsoon yahay in uu horseed ka noqdo dadaalka Alberta ee ku saabsan Tirtiridda Dagaalka Qoyska iyo Xoog u Sheegashada.